



## Nabadeey ardayda dugsiiga sare!

Sida aad adiguba u ogtahay faafida cudurka Covid-19 way ku korodhay gobolkeena oo dhamaanteen waxaa la ina faray adkeynta talooyinka inaynu ku dhaqano si loo yareeyo faafida cudurkan. Tababaryada waa la joojiyay, dhamaan isku imaatinyada bulshada sida xafladaha iyo munaasabadaha waa in la iska ilaaliyo oo booqashada dukaanada iyo meelaha kale ee dadweynaha ka dhaxeeya waa la xadeeyay.

## Qayb ka mid ah waxbarashadu waxay dhici doontaa iyadoo aan la joogin iskoolka

Faafida cudurkan waxay raad ku yeelanaysaa xitaa iskoolka oo si la isaga ilaaliyo in lagu dhaco xaaladii gu'gii waxaa Kunskapsförbundet go'aamiyeen in dugsiyada sare in waxbarashada qaarkeed lagu wado iyadoo aan la joogin iskoolka. Go'aankan wuxuu ansax yahay ilaa iyo 19 Noofambar oo ay dhici karto in la sii dheereeyo.

Waxbarashada iyadoo aan goobta la joogin ma khuseyso dadka oo dhan - iskoolku wuu furnaan doonaa oo dadka badankoodu waxay u dhigan doonaan si ku dhow sidii caadiga ahayd laakiin kooxaha qaarkood waxay qaadan doonaan waxbarasho iyadoo aan joogin iskoolka gebi ahaanba ama qaybo ka mid ah wakhtiga iskoolka. Siyaabo kala duwan ayay u eekaan doontaa saddexda dugsi sare ee Kunskapsförbundet oo dhismayaasha ayaa taas saamayn ku yeelanaysa.

Sidaas ayay ku fududaan doontaa in la kala durko masaafu ahaan oo loo yareeyo ciriiriga iskoolada iyo xitaa in la caawiyo bulshada oo dhan maadaama ay yaraanayaan dadka u baahan inay isticmaalaan gaadiidka dadweynaha ee jooga meelaha dadweynaha ka dhaxeeya.

## Warbixin dheeraad ah waxaad ka helaysaa la taliyahaaga

Haddii aad ka mid tahay dadka waxbarashada qaadanaya adigoon joogin iskoolka markaas waxaad macluumaadka oo dhan ka helaysaa la taliyahaaga. Adigu waxaad xitaa macluumaad kahelaysaa Itslearning iyo bogga intarnatka ee iskoolka.

### Waxyaabo muhiim ah oo aad u baahantahay inaad samayso iminka:

- Fiiri Itslearning iyo bogga intarnatka ee iskoolka maalin kasta si looga warhayo wixii isbaddalo ah ee dhici kara.
- Kombiyuutarkaaga iyo xariga jaarjarka guriga u sii qaado maalin kasta. Adigu waad u baahan kartaa haddii go'aamo cusub soo baxaan.
- Alaabta kale ee iskoolka u sii qaado guriga maalin kasta sida buugta iyo wixii kale ee aad u baahantahay dhanka waxbarashadaada.

Dhanka Itslearning iyo bogga intarnatka waxaa xitaa ku soo bixi doonaa macluumaad fiican kara in la helo haddii qofku uu baahanyahay in wax laga caawiyo haddii qofku waxbarashada qaadanayo iyadoo aan la joogin iskoolka. Gudida caafimaadka ardayda iyo gacanyaraha arrimaha kombiyuutarada ayaa ku taageeri kara adiga haddii wax ka xumaadaan kombiyuutarkaaga ama haddii aad u baahantahay dhiirigelin yar ama taageero dhanka waxbarashadaada ah.

## **Iminkana waa wax la mid ah wax aanu wakhti kasta ka hadalno**

Waanu ognahay in xilligii gu'ga waxbarashadii iyadoo aan la joogin iskoolka ay adkayd oo kadeed ku ahayd dad badan. Sidaas darteed waxaanu samaynaynaa wax walba si aynaan halkaas dib ugu dhicin. Si wadajir ah ayaynu u joojin karnaa faafida cudurkan si aynu u helno inaynu mar kale u helno nolol caadi ah. Waa taas arrinta aynu rajeyneyno dhamaanteen.

Laakiin ugu horeyn waxaynu ku dadaalaynaa inaynu joojino faafida cudurkan iyadoo la is caawinayo.

Waanu ognahay inaad horeyba u ogeyd, laakiin haddana waanu idin xusuusinaynaa:

- Guriga joog haddii aad leedahay xitaa wax yar oo calaamado xanuun ah. Baaritaan iska qaad.
- Gacmahaaga dhaq.
- Baaskiil ama lug ku imo iskoolka haddii ay suurtagal tahay.
- Dadka kale ka durug masafo ahaan!

Salaan diiran,  
Kunskapsförbundet